



## HAGAHA SOO DHAWAYNTA



Ohio EPPICard® Debit MasterCard® waxaa soo saaray Comerica Bank, iyadoo la raacayo liisan MasterCard® International Incorporated.

### Ku soo dhawoow Kaarkaaga Ohio EPPICard® Debit MasterCard®

Si laguugu sahlo, gargaarka kaashkaaga waxaa si toos ah loogu shubi doonaa akoonka EPPICard® Debit MasterCard® Card kaaga ee Ohio.



### Wixii Adeegga Macmiilka iyo Kiciska Kaadhka



#### Wac 1-866-320-8822

24 saac maalintii/7 maalmood toddobaadkii Wicitaanada Caalamka: 1-866-771-6981 (Bilaash)



Xisaabta Baalansiga Kaarhka & Taariikhda wax gadashada Booqo: [www.EPPICard.com](http://www.EPPICard.com)



### Degdeg u Kici Kaarkaaga Cusub

Wac toll-free Customer Service number 1-866-320-8822 (Waxa kale oo laga helaa numberka dhabarka kaadhkaaga). Raac dardarka lagu kiciyo Kaadhkaaga, dooro afar-god Lambar Aqoonsiga Shakhsiyeed (PIN) oo qarsoodi ah si aad u kiciso Kaadhkaaga.



### Hel Lacag Caddaan Ah

Waxaad la bixi kartaa lacag caddaan ah dhowr siyaabood oo haboon adiga oo isticmaalaya Kaadhkaaga iyo PIN-kaaga.

Weydiiso lacag caddaan ah goobaha aad u jeceshahay ee U.S oo wax iibiyo. Dukaanada intooda badan adeeggan ma dul saartaan lacag.

Waxaa laguugu ogol yahay hal (1) jeer oo lacag kala baxdid ATM oo kharash la'an ah bil kasta goobaha Neetwooga ee isla shaqeyaa.

Waxaa laguugu oggol yahay xad la'aan lacag aad la baxdid ay ku caawiyeen teelarka dariishadaha bangiyada ka tirsan MasterCard® Member Bank ama Union Credit.



### Hel Ogeeysiyada Debaajiga ah ee Ootomaatiga Ah

Diyaarso ogeeysiyada debaajiga ah ee ootomaatiga ah si aad u ogaato marka lacagaha kuu yimaadaan. Waxaad heli kartaa ogeysiiska Debaajiga ama deboosit oo Email, Telefoon or Fariinta Qoraalka ah mar kasto oo debaaji la sameeyo. Iska diiwan geli **1-866-320-8822** ama [www.EPPICard.com](http://www.EPPICard.com).

(Heerarka fariin Standard codsan.)



### Iska-ilaali Fiika ATM Dul Saarka Ah

Milkiilayasha ATM qarkood ayaa soo rogi karaa lacag dheeri ah oo loo yaqaan "dulsaar" ama "lacagta fudud-eynta". Akhri fariinta shaashada si taxadar leh wixii macluumaad ah ee la xiriira lacagta dulsaarka ka hor inta aanad taaban "Enter". Waad iska ilaalin kartaan dulsaarka xisbiga saddexaad adigoo isticmaalaya ATM ka shaqeyaa Fifth Third Bank, Alliance One ama PNC Bank. Netwoogyada isla shaqeyo waxa ka mid ah PNC ama Alliance One partners: Wright-Patt, Directions Credit Union, Ohio University Credit Union, Hancock Federal Credit Union, iyo ATM-ka State Bank. Waxaa laguugu ogol yahay Hal (1) jeer lacag laga baxsado ATM oo fii la'an ah bil kasta ayaa ka jira meelaha ATM-ka neetwoogayada isla shaqeyo. Raadso astaamahan:



### Halka lagu Isticmaalo

Ku isticmaal Ohio EPPICard® Debit Card MasterCard® dukaanada ogolaada MasterCard®. Tani waxan ku jirin qoobaha la xadiday ee lagu iftiimiyeey sanduuqa hoose "Digtoonada Kaar haystayaasha".

- Shoobin ama iibsasho
- Ku Bixi Biilalka
- Daryeelka caafimaadka iyo daawada
- Ku Bixi Dugsiga iyo Sahayda
- Raashinka
- Ka bixi-bambada-Shiidaalka

**Digtoonada Kaadh haystayaasha:** Sharciga Federaalka wuxuu reebayaa isticmaalka waxtarrada gargaarka kaashka ah kala jooga meelaha soo socda:

- dukaanka khamriga kasta ama dukaanka tafaariiqda inta badan iibiya khamriga;
- Goob kasta oo kasiino ah, kasiinada khamaarka ama meelaha ciyaaraha khamaarka; ama
- Meel kasta oo tafaariiqda oo bixiya madadaalada dadkaweyn u janjeedha oo la isku qaawiyo ama u qabtaan hab isqaawis ahaan ah.

Tan waxay ka mid yihiin mashiinka lacagta ootomaati ahaan loogala baxo (ATM) iyo mashinada kaarka la marsado marka waxa la iibsano.



### Walwal La'an Ka Imaado Ilaalinta Ammaanka

Si ka duwan jeeg ama lacag caddaan ah, waxa kale oo aad ka helaya ilaalinta ammaanka dheeraad ah oo kaa caawinaya lacagtaada inay ku jirto ammaan iyo ka hortag, lagu ogaado iyo lagu xaliyo musuqmaasuq.



### 24 Saac Adeegga Macmiilka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ama aad qabto su'aalo ku saabsan Kaadhka EPPICard® Card ee Ohio wakhti walba maalinta ama habeenkii, booqo web site at [www.EPPICard.com](http://www.EPPICard.com) ama naga soo wac taleefanka lacag-la'aanta ah ee **1-866-320-8822** ka baxsan Maraykanka, naga soo wac ee 1-866-771-6981). Wixii su'aalo ah ee ku saabsan waxtarrada gargaarka kaashka ah ama si aad u cusboonaysiiso cinwaankaaga boostada, la xiriir shaqaalaha kiiskaaga ee Degmada Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska.

Waxaa laguugu oggol yahay in aad sameeyso ila toban (10)wacitaan oo lacag la'aan ah bil kasta adeegga macaamiisha otomaatigga ah si aad u ogaatid lacagtaada. Lacag fii ah oo ah \$0.25 ayaa laguugu dalacaya wacitaan walba oo dheeraad ah.

Ma jirto fii laga rabo wacitaanka ootomaatiga ah ee Adeegga Macmiilka ee EPPICard® marka aad:

- Codsanaysid Kaadh laguugu bedelo

- Soo sheegeysid dibaatooyin la xidhiidha lacag bixino ama debaajiyada
- Weydiinaysid caawitaan dibaato ku sabsan akoonka Kaadhkaaga
- Dooraynso ama bedeleysid PIN-kaaga
- Soo sheegaysid Kaadhka kaa lumeen, la xaday ama xumaadeen

Waxaa nala heli kara maalin kasta 24-saacadood si aad u hubiso balaanskaaga ama deboositka iyo taariikhda wax gadashada, beddesho PIN-kaaga, soo sheegto kaarka ka lumay ama la xaday, ama helidda macluumaad Kaadhka

### Jadwalka Fiiga

Jadwalkan fiigu wuxuu liisgaraynaya lacagaha ama fiiyada laga baxsado lacagta ama balanska kujirta Kaadh-kaaga marka laga reebo meelaha sharciga mamnuucayo.

Sharaaxad	Qiimo/Fii
Macluumaadka Kaadhka ee Online-ka – qadka <a href="http://www.EPPICard.com">www.EPPICard.com</a>	Ma jiro Fii
Fariimaaha Haystaha Kaadhka** – Email, Telefoon ama Fariinta Qoraalka ama textka	Ma jiro Fii
Kaadhka la Mariyo Mashiinka Dukaanada (POS) – PIN ama Saxiix	Ma jiro Fii
Ogeysiis Debaaji ama deboosit** – Email, Telefoon ama Fariinta Qoraalka ah	Ma jiro Fii
Lacag ATM Laga baxsado (Netwooga-isku xiran)	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Hal (1) jeer lacag laga baxsado ATM oo fii la'an ah bil kasta ayaa ka jira PNC ama Alliance One partners: Wright-Patt, Directions Credit Union, Ohio University Credit Union, Hancock Federal Credit Union, iyo ATM-ka State Bank</li> <li>• \$0.75 ayaa dulsaaraya lacag kasta oo dheeraah ah laga baxsado ATM</li> </ul>
Lacagta Laga Baxsado ATM* (Netwooga-Xidhiidh lala lahayn)	\$0.75 lacag kasto oo lagala baxo ATM maamulan PNC ama goobaha ATM- ka ee Alliance One partners
Xogta Balanska ama Lacagata laga Ogaado ATM (Netwooga-isku xiran)	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Hal (1) baadhitaan balans oo ATM ah oo lacag la'an bil kasto meelaha ATM Netwoogyada-gudaha</li> <li>• 0.40 ayaa laguugu dalacaya baadhitaan kasta oodheeraad ah</li> </ul>
Xogta Balanska ama Laca- gata laga Ogaado (Netwooga- Xidhiidh lala lahayn)	\$0.40 Baadhitaanka balanska ee ATM oo laga soo galo netwoogyo kale aan xidhiidh ka mid ahayn
Lacag La Bixidda uuCaawinayo Teelarka	Ma jirto fii lagaa rabo marka lacag la bidda ka caawinayo teelarka dariishada meelaha ka tirsan MasterCard® Member Bank ama Union Credit
Bedelaadda Kaadhka	Ma jirto wax lacag laguugu beddelo Kaadhka
Wacitaank aotomaatiga ahaa Adeegga Macmiilka ee EPPICard®	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Toban (10) wacitaan lacag la'aan ah bishii</li> <li>• \$0.25 laguugu dalacaya wacitaan walba oo dheeraad</li> </ul>

\* Milkiilaha ATM ayaa sidoo kale soo rogi karaa lacag dheeri ah oo loo yaqaan "dulsaar" ama "lacagta fudud-eynta". Akhri fariinta shaashada si taxadar leh wixii macluumaad ah ee la xiriira lacagta dulsaarka ka hor inta aanad taaban "Enter". Waxaad fursad u heli doontaa inad joojiso lacag la bixiddo oo tag mishiin ATM ah kale.

\*\* Adiga ayaa ka masuul ah dhammaan fiiaadka iyo lacagaha la xidhiidha isticmaalka email ama fariimaha qoraalka ay soo rogeen kabaniga mobile-ka ah ama adeeg bixiyaha internet-ka